Su'aalahaaga Caabuqa Koofid (COVID):

# Baahida tallaalka xoojiyaha macnaheedu ma waxaa weeye in aysan tallaaladii hore shaqeynin

Jan 14. 2022

## Jawaab: **MAYA.**

**1**. Tallaalada ka hortagga Caabuqa Koofid-19 (COVID-19) waa kuwo waxtar leh, xataa haddii aan u baahano tallaalada xoojiyaha.

**2.** Xanuunada badankood, hal tallaal ka badan ayaa loo baahan yahay si loo helo tallaalka ugu wanaagsan ee suurtagalka ah.

**3**. Tallaalada carruurta caadiga ah oo badan waxay kaloo u baahan yihiin tallaalada xoojiyaha. Tusaale, carruurta waxaa tallaalo badan loo siiyaa ka hortagga jadeecada, qumanka iyo jadeeco jarmalka (rubella).

**4**. Xataatallaalkaxoojiyahala'aantiis, tallaaladacaabuqa Koofid-19 (COVID-19) waxaygacankageystaanyareyntanoocyadadaraneexanuunka, haseyeesheesidadhammaantallaaladabadankood, difaacaasuwuxuu la yaraadaamuddada.



**Ma ogsooneyd in?**

- Dadka intooda badan ee daryeel degdeg ah ugu baahan caabuqa Koofid-19 (COVID-19) waa kuwo aan tallaalneyn.
- Haddii aad si buuxda u tallaalan tahay, waad qaadi kartaa caabuqa Koofid-19 (COVID-19), haseyeeshee waa yar yahay suurtagalka in aad aad u xanuunsatid.
- Dad badan ayaa iska tallaala hargabka jiilaal kasta (winter). Sababtu waxay tahay fayraska hargabka ayaa xoogaa isbeddala sanad walba, marka tallaalada cusub waa in ay ayakuna xoogaa isbeddalaan.(1)

(1) https://www.cdc.gov/flu/prevent/keyfacts.htm

Qoraalka xogohaan waxaa ansixiyey koox khubaro la-taliyaal ah.

*Financial contribution from*
*Avec le financement de*

Public Health Agency of Canada
Agence de la santé publique du Canada

Metropolis Institute - Institut

Vaccine Uptake Network · Réseau Adhésion Vaccination

**Haddii aad dooneysid xogo dheeraad ah?**

Waxaad xogo dheeraad ah ee caabuqa Koofid-19 (COVID-19) ka heli kartaa halkaan:

https://bit.ly/3qQHmOx